

# Dhameystirka Codsiga Dheefaha Cuntada

## Maxay tahay?

Codsiga Dheefaha Cuntada waa codsi qarsoodi ah oo lagu go'aansanayo u qalmida ardayga ee cuntooyinka dugsiga bilaashka ah iyo kuwa qiimaha laga dhimay. Dugsiyada deegaanka ayaa weydiyo waaladiinta/masuulada inay buuxiyaan bilowga sannad dugsigeed walba si ay uga caawiso go'aaminta daqliga qoyska ee arddayda iyo bulshada.

## Maxay muhiim u tahay?

Dhameystirka codsiga dheefaha cuntada ee qoyskaaga ayaa ah qaab fudud oo lagu maalgelinayo waxbarashada bulshadaada, xittaa haddii aadan u maleynin inaad u qalantid. Xogta daqliga qoyska ee lagu bixiyay codsiga ayaa ogeysiineyso illaha maalgelinta waxbarashada ugu muhiimsan oo ay ka caawiso ku jaheynta dheefaha kale ee qoysaska laga yaabo inay u baahdaan.

## Sida loo buuxiyo:

Codsiga waxaa lagu heli karaa dhinaca barnaamijka nafaqada dugsiga degmada deegaankaaga. Degmooyin badan ayaa codsiga ku diyaariyay onleenka in lagu dhameystiro. Nooca la daabacay ee codsiga ayaa sidoo kale la helayaa—waxay inta badan ka qeyb noqoneysaa bilaabida waraaqaha shaqada ee guriga la imaato canugaaga.

## Barnaamijyada lagu Maalgeliyay iyada oo La isticmaalayo Xogta ka imaaneyso Codsiga Dheefaha Cuntada:

Lacag celinada faderaalka ee cuntooyinka dugsiga ayaa maalgeliyo illo badan oo waxbarashada ah. Tani waxaa ka faa'ido dhammaan carruurta Maine. Barnaamijyadaan waxaa ku jira:

- Dugsiyada Title 1
- Xeerka Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare (ESEA)
- Xeerka Shaqsiyaadka qabo Curyaannimada (IDEA)
- Maalgelinta gobolka ee dugsiyada
- Barnaamijyada dugsiga ka hor/kadib
- Barnaamijyada dugsiga kuleelaha
- Barnaamijka waxbarashada iyo fursadaha lacagta ee ay bilaabeen Maine DOE
- Cafinta amaahda macalinta ardayga



## Ku xirmida Adeegyada Qoyska Muhiimka ah

Haddii qoyskaaga ku dhaco sida waafaqsan tilmaamaha cuntooyinka bilaashka/la qiimo dhimay, waxaad heli kartaa faa'idooyinka nafaqada dheeraadka ah dhinaca Barnaamijka Safmarka EBT (P-EBT)! Dhameystirka codsiga xiliga Agoosto 31, 2021, waxaad u qalmi kartaa inaad heshid bixinta xagaaga ee faa'idooyinka P-EBT iyo bixino walboo mustaqbalka ah inta lagu jiro sannad dugsiyeedka 2021/2022.

